



Tirada Renton
**Census
2020**

Muhiim. Fudud. Badbaado ah.



rentonwa.gov/2020census



United States®
**Census
2020**



10

su'aalood oo
fudud oo laga
jawaabo

10

daqiiqo oo
ayuu kaa
qaadanayaa

10

-sano ayuu
bulshada saamayn
ku yaalan doonaa

Muhiim Natiijooyinka Tirakoobku waxay ku yeelan doonaan saamtayn 10-sano ah bulshadeena. Waxay go'aamiyaan qorshaynta malaayiin doolar oo lagu maalgaliyo dugsiyada, cusbitaalada, waddooyinka, iyo adeegyo kale oo badan oo muhiim ah oo loogu talagalay carruurta, muwaadiniinta waayeelka ah, dadka naafada ah iyo askarta hawgabtay, iyo qaar kale. *Jawaabtaadu isbaddal ayey keenaysaa, iyadoon la eegin xaaladdaada muhaajirnimo.*

Fudud Tirakoobka wuxuu dadka ka waraystaa 10 su'aalood oo aasaasi ah oo kusaabsan shakhsiyadka ku nool gurigaaga laga bilaabo 1 Abriil. Ku jawaab onlayn, taleefan ama boostada kharashka la sii bixiyey.

Badbaado ah Jawaabaha tirakoobku waa bilaa aqoonsi, qarsoodi oo sharciga ayaa ilaaliyey.

Waa Maxay Gunooyinka Renton

Kuwa soo socdaa waa tusaalayaal deeqada gobolka iyo federalka Renton ee la heley 2018. (Tani kaliya waa HAL sano! Tirakoobku waxa uu waxtar yeelan doonaa TOBANKA sano ee soo socda.)



\$3,275,977

WADARTA Deeqda Lacagta Federalka ee la heley 2018



\$2,172,073

Dhismaka Gaadiidka



\$640,886

Deeqda Dhismayaasha Hormarka Bulshada



\$2,300+

Qiyaasta qofkiba, sanadkii



Abriil 1, 2020 waa maalinta tirakoobka

10 sano kasta, Maraykanku waxa uu qabtaa tirakoob qaran.

WAXA LA TIRIYAA ADIGA IYO QOF KASTA OO QOYSKAAGA AH, oo ay ku jiraan caruurta markaa dhalatay laga bilaabo Abriil 1. Qoyskaaga waxaa kamid ah dhamaan dadka ku nool ama degan gurigaaga iyada oo aan la eegeynin waxa aad isku tihiin.

United States®
Census
2020

Waxa La Filan Karo

Tirakoobka 2020 waxa aanu kugu waydiin doonaa:

1. inta qof ee degan ama ku noolaan doonaa ama deganaan doonaa gurigaaga Abriil 1, 2020;
2. hadii ay jirto cid kale oo kula nooli;
3. hadii aad guriga leedahay ama uu kiro kugu yahay;
4. lambarkaaga taleefanka;
5. magacaaga;
6. jinsigaaga;
7. da'daada/taariikhdaada dhalashada;
8. hadii aad tahay Hispanic, Latino, ama Isbaanish;
9. qoomiyadaada; iyo
10. waxa ay isku yihiin dadka kale ee degan guriga qofka buuxinaya foomka.

Sirta

Macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed sirtiisa ayaa la ilaalinayaa sharciyan.



Xafiiska Tirakoobka lama wadaagi karo wajaabahaaga cidda leh guriga aad degan tahay, wax maxkamada ah ama hay'ad dawladeed, oo ay ku jiraan FBI, ICE ama Waaxda Amniga ee Arrimaha Gudaha. Jawaabahaaga kuuguma isticmaali karto wax hay'ad dawladeed ama maxkamad ahi.

Xafiiska Tirakoobku MARNA:

- » limeel kuuma soo diri doono
- » Ku waydiin maayo lambarkaaga Amniga Bulshada, magaca hooyadaa aabaheed, macluumaadkaaga bangiga, lacagtaada, ama wax kale oo uu ku matalayo xisbi siyaasadeed.
- » Kaama dalban doonaan inay gurigaaga soo galaan.
- » Kuuguma hanjabi doonaan xadhig.



Waxa laguusoo diri doonaa warqad boosta ah oo casuumad ah

Goys kasta oo jooga dalka waxa uu ikhtiyaar u leeyahay inuu online ahaan kaga jawaabo, taleefanka ama boos ahaan. Online ahaan iyo taleefanka su'aalaha ah waxaa lagu heli karaa Ingiriisi iyo 12 luuqadood oo aan Ingiriisi ahayn.

Kaga jawaab online ahaan ama taleefanka

MAARSO 12-20

Casuumada kaga jawaabida boosta.

MAALINTA TIRAKOOBKA: Waxaa la tirinayaa qof kasta laga bilaabo Abriil 1!

Hadii aanad weli ka jawaabin...

ABRIIL 8-16

Su'aalaha tirakoobka ee waraaqaha ayaa boosta lagu dirayaa.

**MAAJO-DHAMAADKA
JUULAY**

Tirakoobka cida qaadaysa ayaa daba socon doonta hadii ayna ku helin jawaabta online ahaan, taleefanka ama boosta.



Tirada Renton
**Census
2020**

rentonwa.gov/2020census

Hadii aanad internet heleynin, lasoo hadal lambarka taleefanka ee bilaashka ah ee ku qoran warqada casuumada ama la kala xidhiidh Maamulaha Barnaamijka Tirakoobka Renton 425-430-7728.